# Somalia: Boos Ugama Bannaana Carruur

## Askaryenta Carruurta, Guurka Qasabka Ah, Iyo Weerarrada Iskuullada

Copyright © 2012 Human Rights Watch
All rights reserved.
Printed in the United States of America

Human Rights Watch is dedicated to protecting the human rights of people around the world. We stand with victims and activists to prevent discrimination, to uphold political freedom, to protect people from inhumane conduct in wartime, and to bring offenders to justice. We investigate and expose human rights violations and hold abusers accountable. We challenge governments and those who hold power to end abusive practices and respect international human rights law. We enlist the public and the international community to support the cause of human rights for all.

Human Rights Watch is an international organization with staff in more than 40 countries, and offices in Amsterdam, Beirut, Berlin, Brussels, Chicago, Geneva, Goma, Johannesburg, London, Los Angeles, Moscow, Nairobi, New York, Paris, San Francisco, Tokyo, Toronto, Tunis, Washington DC, and Zurich.

For more information, please visit our website: http://www.hrw.org

# Qoraal Kooban

> Waxaan ka tirsanaa al-shabaab sadex bilood sanadkii 2010…. Waxey rabeen iney dagaal noo tababaraan waan cabsaday. Ma dooneynin inaan dad dilo. Waxaan rabay inaan iskuul ku noqdo oo aan wax barto.
> —Amare A. (ma ahan magaciisa runta ah), 10-jir-wiil ah ka yimid Muqdisho, degan Kenya, June 2, 2011

Caruurrta ku nool dalka Soomaaliya ee dagaalku halaajiyay ayaa mar walba dhibaatooyin la soo gudboonaadaan, kuwaas oo ay ka mid yihiin askareyn qasab ah, guur qasab ah, kufsi iyo weerarro ay ku soo qaadaan iskuuladooda kooxaha iska soo horjeeda. Kuwa iyaga masuuliyadan leh ayaa marnaba aan loo raacanin.

Caruurta lagu tilaamaamo in ay da'doodu ka yar tahay 18-jir, ayaa ugu badan inta ay waxyeeladu ka soo gaaraan dagaalada socda. Dagaalada u dhexeeya Dowlada Ku meelgaarka (TFG), ciidamada midowga Afrika ee ka howlgala Soomaaliya (AMISOM), iyo TFG-da milishiyaadka taabacsan iyo al-shabaab, kooxaha islaamiyiinta hubeysan oo waqtigan ka taliya wadanka intiisa badan, isla mar ahaantaana aad ugu xooganaa magaalada Muqdisho iyo qeybo ka mid ah bartamaha koofurta Soomaliya bartamihii sanadkii 2010-ka iyo horraantii 2011. Bartamihii Oktoobar 2011-kii waxaa sii qaraaraaday dagaaladii ka socday koofurta Soomaaliya kuwaasoo ay wehliyeen soo gelitaankii ciidamada hubeysan ee dalka Kenya oo ka soo horjeeda al-shabaab, muddo yar ka dib ayaa waxaa soo wehliyay soo galitaankii ciidamada Itoobiya.

Carruurta ayaa badanaa dhibka ugu badan ka soo gaaraa duqeynta aan loo meel dayin iyo dhibaatooyinka ay geystaan hubabka fud fudud ee mudada dheer lagu yaqaanay dagaalada Muqdisho. Sidoo kale waa kuwa qaba dhabaatada ugu badan ee baahida dhibaatada bini aadannimo, taasoo ay UN-ku ku tilmaameen iney macluul ba'ani ka jirto bartamaha- koofurta Soomaaliya iyo waliba dagaalada socda ee u dhexeeya al-shabaab iyo TFG-da.

Warbixintan waxey caddeynaysaa bartilmaameedsiga al-shabaab ay ku diiwaan galinayaan kuna askareynayaan carruurta, guur qasab ah iyo kufsi, iyadoo aan diirada saarnay wax yeeleyntii sandkii 2010-ka iyo 2011-ka. Marka lagu daro, waxey caddeynaysaa

sida ay kooxdani u bartilmaameedstay ardayda, macalimiinta iyo werarrada dhismayaasha iskuulada. Dagaalyahanda al-shabaab oo sidoo kale iskuulada u isticmaalaan aag ay kasoo ridaan rasaasta, ardaydana u isticmaala “gabbaad” iyagoo galinaya caruurta halis dhaawac iyo dhimasho kaga yimaadda duqeynta faraha badan ee aan loo meel dayin iyo hubka xadka ka baxsan oo ay ku soo jawaabayaan TFG-da ama xoogaga AMISOM.

Carruur ayaaTFG-da iyo maleeshiyaadka taabacsan ka mid ah ciidamadooda, inkastoo Human Rights Watch ay si madaxbanaan u awoodin iney cadeyso tirada iyo caddadka. Warbixintan, ayaa waxa ay Human Rights Watch wareysi kula yeelatay 164 qaxooti soomaali ah oo dhawaan yimid xeryaha qaxootiga ee dhadhaab iyo Nairobi bishii Maajo iyo Juunyo 2011. Dadka la wareystay ayaa waxaa ka mid ahaa in ka badan 81 gabdhood iyo wiilal kuwaasoo ay da’dooda waqtigaas ay ka yareyd 18-jir. Human Rights Watch waxey sidookale wareysiyo la yeesheen madax ka tirsan TFG-da, madax ka tirsan Qaramada Midoobay (UN) iyo midowga Afrika, xubno ka tirsan, hey’ado madax banaan iyo qeyb ka mid ah jaaliyadaha diblomaasiyiinta.

Inkakastoo aysan aheyn mid ku cusub dagaalka kow iyo labaatan jirsaday ee ka socda Soomaaliya iney ka qeybqaataan carruur, waxaa soo kordhayay in ay al-shabaab tiro caddadka ka baxsan ay tahay carruurta ay askareeyeen illaa iyo bartahimmihii-2010-kii; labadii sano ee u dambeeyay waxaa si isdabajoog ah u soo noqnoqonayay weerarka ardayda, macalimiinta, iyo iskuullada..

Al-shaab ayaa buun buuninta xagjir-nimadooda iyo balanqaadyo carruurta ku galin jirtay iney ka mid noqdaan, illaa iyo bartamihii-2010-ka waxey sii kordhiyeen carruurta ay sida qasabka ah ku qortaan si ay u xoojiyaan magacooda sii tirtirmaya.

Carruurta ma jirto goob ay isku qariyaan. Al-shabaab ayaa qafaalanaysa marka ay yimiidaan goobaha lagu kulmo: iskuulada, meelaha lagu ciyaaro, garoomada kubadda cagta, iyo guryaha, qaas ahaan iskuullada ayaa ah bar tilmaameedyada ugu soo jiidashada badan—14 ka mid ah 21 kii carruur ee ka soo baxsaday al-shabaab waxaa laga afduubtay iskuullada ama iyagoo iskuul u socda

Caruurta ku jirta xarumaha tababarka al-shabaab noloshoodu waa mid adag: wiilasha ayaa la mariyaa tababar adag sida iyaga oo dagaal dhab ah ku jira, tababar dhanka hubka ah, iyo diinta, siyaasadda, xilliga waxbarashadooda ayaa sidoo kale qaarkood waxey noo

sheegeen in lagu qasbo iney fiirsadaan viidiyow ismiidaamin ah. Wiilashu waxey sidoo kale tilmaameen iney goobjoog u ahayeen ciqaab jirdil oo aad u foolxun iyo dil loo geysanayey kuwa lagu soo eedeeyo iney u jaajuusaan TFG-da, iyo kuwa isku daya iney baxsadaan amaba u hogaansami waaya amarada.

Maleeshiyada al-shabaab ayaa caruurta safka hore dagaalka ka galisa, badanaa iyagoo tababar ku filan qabin. Dhowr marqaati ayaa ka hadlay carruur si toos ah loogu isticmaalo “gabbaad” in ay u noqdaan kuwa dagaalka qibradda u leh xilligii ugu qaraaraa dagaaladii Muqdisho. Kuwa kale, marka lagu daro carruurta aadka u da’da yar ee aan hubka qaadi Karin, iyaga oo aan raali ka ahayn ayaa la handadaa laguna qasbaa iney noqdaan kuwa loo isticmaalo ismiidaaminta . sidoo kale xilliyada uu dagaalka socdo, al-shabaab waxa ay carruurta u isticmaalaan howlo kala duwan, oo ay ka midtahay iney furinta u qaadaan walxaha qarxa, biyo, caano, iyo cunto; iney qaadaan dhaawaca, meydka; iyo iney u jaajuusaan, waardiyeeyaan, una xammaalaan.

Gabdhaha la soo afduubo ayaa loo xilsaara howlaha cunto Karinta, nadaafada, iyo wixii kale oo la xiriira howlahaas xarunta dhexdeeda. Al-shabaab ayaa gabdhaha iyo dumarka da’da yar aan u siticmaalin howlaha ay ku caawinayaan howlgaladooda oo kaliya, balse sidoo kale u geysta kufsi iyo iney qasab ugu guuriyaan dagaal yahanadooda. .

Carruurta, qaraabadooda, iyo macalimiintooda ee isku daya iney hor istaagaan qorista iyo afduubka ama baxsi ayaa cigaab adag la kulma. Al-shabaab ayaa dhaawacay amaba dilay waaliddiin isku dayay iney carruurtooda difaacaan inkastoo mararka qaar ay ku guuleysteen waaliddiin iyo duqow ay ka soo dayaan carruur al-shabaabka xaafadda ay afduubteen.

Marka carruurta ay ka baxasadaan al-shabaab ama galaan gacanta TFG-da ama AMISOM, ama lagu qabsado furinta dagaalka, waxa ay la kulmaan wareysiyo kaga yimaadda ciidamada sirdoonka ee TFG-da, xarig, iyo iyagoo aan siinin mustaqbal balanqaad leh halkii laga filayay iney carruurnimo u difaacaan.

Sida warbixinta la hayo ay sheegayso ma jiraan carruur ay TFG-da qasab qu qoratay, carruurta badanaa iyaga ayaa foolkooda ugu taga si mutadawacnimo ah TFG-da ama

maleeshiyaadka taabacsan, difaaca koontoroolada, iyo ka qeyb qaadashada iska hor-immaadyada.

TFG-da ayaa illaa iyo waqtigan la joogo ku fashillantay iney si cad u adkeyso hubinta iyo baaris tayo leh in la marsiiyo da'da dhamaan askarta la qorayo. Kuwa la qoro iyaga oo aan ka qeyb ahayn tababarada ay bixiyaan Yurubiyaanka (EU) Uganda ama si toosa looga soo qoray malleeshiyaadka ayaa waxa ay u badantahay iney ka baxsadaan baarista.

Human Rights Watch ayaan garaneyn wali cid ka tirsan TFG-da oo lagu soo eedeeyay mas'uuliyadda askareynta iyo isticmalka carruurta.

Iskuullaadka ayaa noqday meelo ay al-shabaab fariisimada howlgalada culculus u isticmaasho sidoo kale si ay u xukumaan nolasha Somalida. Carruur badan oo Soomaaliyeed ayaa aadistii iskuullaadka joojiyay halka qaar kalena aysan waligoodba iskuul tagin. Somaaliya ayaa ah meesha adduunka ugu liidata is diiwaangalinta; si kastaba ha ahaatee, dadka dhalinyarada ah iyo caruurta, macallimiinta, iyo dhismayaasha iskuullaadkooda ayaa ah meel ula kac ay al-shabaab weerarkooda ay ula beegsadaan. .

Xoogagga al-Shabaab ayaa iskuullada u badalay furin dagaal, iyo In dhismayaahsa iskuulaadka shaqeynaya ee la dhigto laga soo xabadeeyo ciidamada TFG-da iyo AMISOM waa ulakac looga danleeyahay iney TFG –da iyo AMISOM ay ku soo jawaabaan duqeyn aan loo meel dayin. Dhacdooyinka qaarna al-shabaab ayaa duqeeyay dhismayaal iskuulaad, kuna dileen arday, macalimmiin, iyo dadkale oo goobta ka dhawaa. Kooxdan ayaa iskuullaadka u isticmaala meel ay caruurta dagaalyahan ahaan uga qortaan iyo gabdhaha iyo dumarka da'da yar ku afduubtaan si ay u xoogaan kuna qasbaan guur.

Al-Shabaab ayaa ku soo rogay fasiraaddooda qalafsan ee diinta iskuulaadka ku yaala meelaha ay ka taliyaan, waxeyna xaaraantinimeeyeen barashada Ingiriiska, seyniska iyo maaddooyin kale oo loo aqoonsaday kuwo aan habooneyn, iyo iney ku soo rogaan gabdhaha xaddidaad adag dhanka labiska iyo iney dhexgalaan ardayda labka ah. Waxey handadaad iyo waliba dil u geysteen macalimiin ku adkeystay qaabkii ay racayeen, waxey carruurta ugu qudbeeyeen jihaad iyo dagaal iyagoo uga gol leh xirfad askareyn, waxeyna iskuulaadkii ku wareejiyeen macallimiin iyaga ka tirsan. Casharadii ayaa noqday kuwa laga reebay muhiimaddii, macallimiintii ayaa qaxay, iyadoo meelihii gabi ahaan

iskuullaadka aan laga wada xirrina ay carruurtii heysanin wax barasho haba yaraatee wax macna ah sameyneysa waxeyna u baqayaan nabad galyadooda, tiro badan ayaa ka baxday iskuulada. Gabdhuhuna si xisaabta ka baxsan ayey uga hareen.

Illaa iyo hadda Somaaliya waa meel aan laga tixgalinin dowrista jabinta xeerarka xuquuqda biniaadamka iyo sharciyada gargaarka ee caalamka. TFG-da iyo AMISOM kama aysan qaadin wax talaaba ah hor joogayaasha ciidamada mas'uulka ka ah jabinta xeerarka caalamiga ee u yaala dagaalka ama askareynta carruurta. Al-shabaab ayaa illaa iyo waqtigan xaadirka ah dhagaha ka fureysatay dhammaan baaqyadii ku wajahnaa iney joojiso ku xadgudubka xuquuqul insaanka. Dowladaha taageera TFG-da iyo AMISOM ayaa ku fashilmay iney garan waayaan dhibaatooyinka a-lshabaab iney yihiin kuwo joogta ah sidaa darteedna wax marmarsiiyo ah Dowlada Soomaaliya uma heleyso ku xadgudbidda xuquuqul insaanka.

TFG-da oo heray u beenisay in qaar ka mid ah xoogagoodu ay carruur yihiin lakiin badanaa waqti dambe oo aan sii dhiireyn si cad u aqoonstay baahida loo qabo in tallaabo la qaado lagu joojinayo iney ka qeyb noqdaan isticmaalkooda. Horraantii November 2011-kii ayaa TFG-da si isdaba joog ah loogu sheegay in ay lagalaan UN-ka qorshe go'aan sharciyeeysan ah oo ay ku joojinayaan isticmaalka carruurta iyo askarta. Illaa iyo hadda ma jiraan wax cad ama la taabankaro oo laga badalay u hogaansamida arrintan, qaas ahaan, in si foojignaan ay ku dheehantahay la hubiyo in dhammaan qorista loo maro qaabka xulashada si ay TFG-da uga hortagto askareynta carruurta kulana xisaabtanto ciddii ka mas'uul ah diiwaan galinta carruurta iyo isticmaalidda carruurta ee xoogageeda. Ku soo biiridda qorsheysan ee ay maleeshiyaadku kaga mid noqonayaan TFG-da waa muhiim in kala shaandheyn lagu sameeyaa. TFG-da ayaa culeys badan oo dhanka xaq dhowrka carruurta iyo kan xuquuqul insaanka aan kaga immaanin qeybaha caalamka u matala Soomaliya una qaabilsan tabarucaadda dhaqaalaha iyo siyaasadda, kuwaas oo ay aheyd iney culeys arriintaas ku saaraan. Marka lagu daro Qaramada Midoobay (UN),Amerika, (US) , iyo yurub (EU) "Jidka Geedi Socodka" (rowdhmaabka) la saxiixay bartamihii Siptember 2011 oo hoostagaya xafiiska Qaramada Midoobay (UN) ee qaabilsan siyaasadda Soomaaliya (UNPOS), taasoo ay u arkaan xiriirrada caalamka ee TFG-da in uu yahay jidka ugu fudud oo ay u soo marikaraan kala xisaabtanka TFG-da, ma cadda wax tilmaamaya joojinta askareynta carruurta balse waxey hoos tageysaa calaamado hoosta ka xariiqan oo caddeynaya ogolaashada barista. Halka ay Qaramada Midoobay (UN) iyo Ameerika (US) ay dhawaan ugu baaqeen TFG-da iney joojiyaan iney isticmaalaan carruurta

iyo qorista askareyntoodaba, illaa iyo hadda ma jiro isku day ah in ay ku xiraan TFG-da qodobo la xiriira arintaa.

Ma jiro xal fududeynaya xaaladaha murugsan ee soo wajaha carruurta Soomaliyeed, kuwaasoo badankood aan aqoon u laheyn wax aan dagaal aheyn. Laakiin qeybaha dagaalku ka dhexeeyo iyo kuwa muhiimka ah ee matala waxaa laga doonayaa iney billaabaan xoojinta howlaha la xiriira xuquuqda carruurta, difaaca carruurta, iyo wax barashadooda in lagu daro qorshaha siyaasada iyo nabadgalyada. Qatarta ay leedadahay in ay sii socoto xal u helid la'aanta in la difaaco carruurta Soomaaliyeed loona sammeyn irrid wax barasho oo u furan waxuu dhaxalkeedu noqondoonaa qoom kale oo uu dagaalku lunsaday, fursadahooduna wey caddidmayaan mustaqbalka.

Human Rights Watch waxey dhammaan ugu baaqayaan kooxaha isku haya Soomaaliya in ay si dag dag ah ku soo afjaraan jabinta sharciyada u dagsan dagaalada, qaas ahaan weerarrada aan loo meel dayin oo loo geysto rayidka. Qaas ahaan dhanka carruurta waxaa loogu baaqayaa al-shaab, TFG, iyo maleeshiyaadka taabacsan TFG-da iney soo afjaraan askareynta iyo isticmaalka carruurta ee u dhexeysa. A-shabaab waa iney daaha qaaddaa amar iney kusiiso horjooge yaashooda iney soo afjaraan askareynta iyo isticmaalka carruurta, waana iney si dag dag ah ugu soo wareejiyaan carruurta ka tirsan xoogaggooda ururrada rayidka bulshada ee la shaqeeya Sanduuqa Ururka Qaramada Midoobay u qaabilsan carruurta (UNICEF) iyo difaaca Carruurta, iyo kuwa matala hubinta sii deyntooda si nabadgalyo leh. Waxaa sidoo kale loogu baaqayaa iney joojiyaan weerarrada ay ku hayaan ardayda, macalimmiinta , iyo iskuulaadka.

TFG-da oo ka heleysa gacan siin ururrada caalamiga ah waa iney si dag dag ah oo hubban u hirgaliyaan barista jidka saxda ah ee loo marayo kala shaandheynta da'da qorista askareynta. Waa in sidoo kale sharci lala tiigsadaa kuwa mas'uuliyaddeeda leh ku xadgudubka xuquuqda carruurta, marka lagu daro askareynta iyo isticmaalka carruurta iyo weerarrada sida sharci darada ah loogu qaado iskuulaadka.  Sidoo kale caruurta la soo qabto ee lagu eedeeyo iney al-shakabaab ka tirsanaayeen waa si toosa loogu soo wareejiyaa ururrada dhaqan celinta bulshada iyo dib isu dhexgalka.  Caruurtu marnaba waxaa ka reebban in loo xiro ka qebqaadashada dagalada labada dhinacba.

Ururrada caalamiga ah ee TFG-da waa iney cadaadis saaraan iney TFG-da fuliso go'aamada lagu hor marinayo laguna hir galinayo tallaabo heer qaran oo lagu qaado sidii dhammaan

loo soo afjari lahaa askareynta iyo isticmaalka caruurrta inta lagu jiro inta ka hartay xiliga kala guurka. Waana iney ku sooo rogaan taloobooyin adag oo la xiriira wixi ka yimaada haddii ay sidaa u hogaansami weydo. Ururrada la shaqeeya TFG-da oo ay ugu hereyso Ameerika (US), sidoo kale waa in ay hubiyaan in TFG-da ay gaarsiisantahay heerkii caalami ee laga rabay marka la eego sida ay ula maacaamiiltammaan carurruutii horey uga tirsanaan jirtay a-lshabaab. .

Baaris iyo war bixin lagu sammeeyo xadgudubyada xuquuqda aadanaha, qaas ahaan in la xoojiyaa ka hortaga xad gudubka xuquuqda carruurta. Illaa iyo xilligan gabagabada ah, ururrada deeqda bixiya waa iney ka caawiyaan siyaasad ahaan iyo iney maal galiyaan xafiiska (OHCHR) si loo xoojiyo caddadka wax qabadkiisa ku wajahan baarista iyo ka war bixinta xuquuqul insaanka ee Soomaaliya loona xilsaaro qof qibrad u leh xuquuqda carurrta ee isla xafiiska Qaramada Midoobay ee Xuqquqda Aadanaha (OHCHR) ee loogu tala galay habka Soomaaliya. Xafiiska qaramada midoobay u qaabilsan nabadgalyada (UN) waa in uu siiyaa awood tayo leh kooxda UN-ka u qaabilsan ka warqabka Somaaliya iyo Eritrea si ay u dhameystiraan howlihii hay'adda xuquuqda insaanka waqtigii ay u qabatay dhaafay.

AMISOM iyo TFG-da waa in ay sameystaan qariiradad tilmaameysa meelaha muhiimka ah ee macquulka ay tahay inuu shacab ku badanyahay, marka lagu daro iskuullaadka, isticmaala qariiraddaa si aad u aqoonsataan una dhowrtaan iskuullaadka ku yaalla aagagga ay AMISOM iyo TFG-da ka howlgalaan .

Waa in loo helaa cawino caalami ah howlaha luga difaacayo waxyeeleynta carruurrta, marka lagu daro daaweyn qibradeysan iyo cawino ka taageerta dhanka maskaxda kuwa ka badbaaday faraxumeynta iyo kufsiga, wax barasho, iyo tababarro xirfado xambaarsan waa in laga dardargaliyo Soomaaliya dhexdeeda iyo waddamada qaxootiga uu galayo, waxaan ula jeednaa Kenya iyo Ethiopia.

Ugu dambeyn, waxaan sheegeynaa in dhibaatada xuquuqul insaanka ee Soomaaliya saldhig ay u yihiin qilaafyada Soomaaliaya sidoo kale waxay la mid tahay xalinta kasoo bixid dhibaato daba dheeraatay. TFG-da iyo ururradeeda caalamiga ah waa inay ku dhawaaqaan hirgalinta ergo u qaabilsan UN-ka warbixinta—ama wax qabad muuqdo oo la barbar dhigi karo —oo ay UN-ka ku caddeyn karaan xadgudubyada caalamiga ee ka dhacay gudaha Soomaaliya iyo iney qaadaan taalaabo wax ku ool ah oo lagu tashan karo

# Talo Bixin

## Ku socoto Dowladda Ku Meelgaarka Fedaraalka:

*Quseysa carruurrta ka tirsan ciidamada TFG-da iyo malleeshiyaadka taabacsan- TFG-da*

- In ay mariyaan sharci waafaqsan cid alla ciddii lagu soo oogo in ay ciidamadooda u diiwaan galiyaan ama u isticmaalaan caruurrta da'dooda ka yartahay 18-jir, tayo loo aqoonsan karo midda caalamka u dagsan. iyo in iyagoo isticmaalaya caddeyn guud ahaan. Sii wadidda in ciidamada TFG-da iyo askarta laga mamnuuco askareynta qasabka ah iyo isticmaalka caruurrta ka yar 18-jir. In laga joojiyo maleeshiyada taabacsan TFG-da dhammaan isticmaalka iyo askareynta caruurrta da'dooda ka yartahay 18-jir.

- In la hirgaliyo sharci qeexaya askareynta qasabka ah iyo isticmaalka carruurta da'dooda ka yartahay 18-jir (iyo dhan walba oo ay askareynta ka timaaddo marka lagu daro kooxaha hubeysan) in ay tahay sharci jabin.

- Hirgalin tallaabo qaran oo lagu horumarinayo sidii looga hortagi lahaa askareynta caruurrta iyo isticmaalka TFG-da dhexdeeda. Sidoo kale horumar cad oo la taabankaro in lagu gaaro waqti cayiman marka lagu daro:
  - In hakad la galiyo dhamaan askareynta caruurrta
  - dariiq Sal u ah in loo maro, xeryaha, qalabka tababarrada, xarumaha askareynta, iyo in loo hoggaan-sammo soo caddeynta in si joogto ah loola socdo xalaadaha goobaha hubka lagu keydiyo;
  - Soo gudbin caddeyn warbixin la xiriirta talaabooyin in la qaaday cadeynaya Ciddii dambiyada ka mas'uulka ahayd; iyo
  - Hirgalinta qorshihii leysku raacay ee gudbinta ka hortaga sharci jabinta.

- Hirgalin qaab lagu hubinayo in la helo sidii baaris culus loogu sameyn lahaa in carruurrta da'dooda ay ka yartahay 18-jir aaney u qorneyn TFG-da ciidamadooda, iyo in dhammaan ciidamada la qorayo la marsiiyo kala shaandheyn tayo sareysa leh. Ha qoranina kuwa aad uga shakisaan inay ka yar yihiin da'da sharciga wafaqsan. In loo ogolooda baarayaasha badaxa banaan iney ka qeybqaataan xilliga is qorista, labaaro da'dooda xilliyada mushaar bixinta, iyo in la booqdo goobaha TFG-da si loo caddeeyo kuwa da'dooda ay ka yartahay 18-jir.

- La shaqeyn UNICEF iyo hay'adaha kale ee xuquuqda caruurrta si aad caruurta ka tirsan TFG-da iyo malleeshiyaadka taabacsan ugu gudbisaan ururrada dhaqan celinta bulshada iyo is dhexgalka tasoo ay soo raacayso wax barasho tababar-xirfad iyo cilmi nafsi, iyadoo la raacayo muhiimmada iyo tilmaammaha carurrta ku mid noqday ciidan hubaysan ama kooxo hubeysa ("Paris principles") ee 2007.

- Iyo ku shuruudeynta Carruurta in ay ka mid noqonayaan ciidanka dowladda iyo Booliska si looga saaro maleeshiyada hubeysan

*Quseysa qabsashada askarta caruurrta ah ee TGD-da ama TFG-xulufadeeda*

- In la hubiyo in loo maray qaab sax ah kuwa la qabsado ama"soo baxsada" isla markiiba caruurrta in lagu wareejiyo ururada rayidka bulshada iyo is dhex galka. Caruurrta marnaba looma xiri karo ka mid noqoshada ciidamada xubeysan.

- Carruurta lagu soo eedeeyo iney galeen dambi caalami ah ama mid gudaha ah intii ay ka midka ahaayeen ciidamo hubeysan waa in la mariyaa sharciga ku habboon ee u dagsan dadka yar yar— qaas ahaan xabsiyeyntu waa haddii laga maarmi waayo, waana in aan caruurrta lala xirin dad waaweyn, waana iney heli karaan sharci yaqaan waana in loo aqoonsadaa ilmaha muhiimadda ugu horeysa.. Siin wax barasho iyo dhaqan celin.

- La oggolaado in ay baaritaanno madax bannaan adeegyada qaaska u ah dhowrista xuquuqda carruurta ku sammeeyaan xabsiyada TFG-da marka lagu dare qeybaha aadka loo illaayo (high-security sites).

*Quseysa iskuulaadka iyo howlgalada Miliirariga*

- In dhammaan la Joojiyo weerarrada aan loo meel dayin oo aan kala sooceynin rayidka iyo dagaalyannada, iyo in la qaado taxadar kasta oo suurta galinaya in hubka loo isticmaalayo dagaalka uusan wax yeeleynin ama ay yarataa wax yeelada uu gaarsiin karo rayidka iyo goobaha rayidka marka lagu daro iskoolaadka.

- Qariidadda meelaha muhiimka ee rayidku ku badanyahay, marka lagu daro iskoolaadka, iyadoo ay la socoto kaalmada ururrada, marka lagu daro qeybaha

wax barashada. U isticmaal qariidaddan inaad ku aqoonsataan kuna dhowrtaan iskuulaadka ku yaala meelaha ay TFg-da howlgalada ciidan ka waddo.

- Baaris buuxda in lagu sammeeyo dhamaan werarrada iskuulaadka gaarsiinaya dhibaatooyinka ee ku yaala goobaha ay TFG-da xukunto, taasoo suurta galinaysa in la soo magacaabo kuwa ka masuulka ah dambiyada dagaalka.

- Maxkammada Sharciga Caalamiga iyo Dambi Baarista ee Rome, Ratify the Rome Statute of the International Criminal Court,taasoo ay la socdaan kuwa kale, sida sharciga dagaalka oo la jabsho oo kale ayeye u mamnuuceysaa dagaal ula kac ah in lagu qaado dhismayaasha u qaaska ah waxbarashada, waxaana loogu talagalay in aysan ka mid noqon goob ciidan, xilayada ay dagaaladu soconayaan.

### *Shuruudaha kale ee ku socda TFG-da*

- Hubinta dhamaan eedeymaha wax ku oolka ah ee ku xad-gudubka sharciyada caalamiga xuquuqul insaanka iyo sharciga biniaadanimada in ciidamada TFG iyo kuwa ka garab dagaalama ay dag'dag, dhexdhexaadnimo,iyo baaitaan muuqda, oo lagu qaado kuwa ku ka masuulka ah waxeeleynta, iyadoo aan loo fiirineyn darajadooda, lagulana xisaabtamaa.

- In ay TFG-da dib u magacawdo Wasiirka Daryeelka Caruurta iyo Xuquuqul Insaanka.

- In la hirgaliyo xuquuqaha carruurta u yaalla ee carruurta (CRC) lana taageero sadexdeeda qodob kii la doono, in la hirgaliyo soo af-jaridda dhammaan takooridda ka dhanka ah dumarka (CEDAW), iyo qodobkii horey ugu yaalay Afrika Xuquuqda Biniaadannimo ee Dumarka xaq u siineysa Xuquuq Dadnimo ("Qodobkii Mabuto").

- In la hubiyo in tababarada la siinayo TFG-da ciidamadooda lagu daro tababarka sharciyada caalamiga ee bini-aadannimada kuwaasoo ah kuwo ku habboon oo tayo leh, marka lagu daro dhowrista rayidka iyo iyo goobaha rayidka iyo dhowrista xuquuqda carruurta.

- Lagu dhawaaqo hirgalinta ergo u qaabilsan UN-ka warbixinta—ama wax qabad muuqdo oo la barbar dhigi karo —oo ay UN-ka ku caddeyn karaan xadgudubyada

caalamiga ee ka dhacay gudaha Soomaaliya iyo iney qaadaan taalaabo wax ku ool ah oo lagu tashan karo..

## Ku al-Shabaab

- Si dag-dag ah iney u joojiyaan askareynta carruurta da'dooda ay ka yar tahay 18-jir iyo iney sii daayaan dhamaan carruurta waqtigan ka tirsan ee ka yar 18-jir, taas oo ay aqbali karaan guud ahaan xeerarka u dagsan caalamka.

- La shaqeyn UNICEF iyo hay'adaha kale ee xuquuqda caruurrta si carruurta ka tirsan al-shabaab ay ugu wareejisaan gacanta ururada dib u dajinta, iyo dhaqan celinta.

- In la hubiyo in la mariyaa tallaabo waafaqsan horjooge-yaasha ciidamada ee xarumaha tababarada ku askareeya carruurta ama u isticmaala howla kale iyo iney safka hore galiyaan.

- Si dag-dag ah in loo joojiyo afdduubka gabdhaha iyo dumarka da'da yar iyo in dhammaan lasii daayaa gabdhaha iyo dumarka loo afduubtay quurka qasabka ah iyo ujeeddooyinka kale.

- In la hubiyo in iskuulaadka la ogyahay lana nabad galiyo iyo in ardayda, macallimiinta, iyo maamulayaasha iskuulka ay si nabadgalyo leh uga bixi karaan dhismayaasha xilliyada ay soconayaan howlgalada militariga halkaasoo ay Qatar uga iman karto.

- In la soo afjaro dhammaan weerarrada aan kala sooceynin rayidka iyo dagaalyahannada , lana qaado tallaaba walba oo macquul ka dhigeysa in laga fogaado wax yaabaha ay ciidamadu u isticmaalayaan dagaalka in aysan wax yeeleynin rayidka, goobaha rayidka iyo iskuulaadka.

- In si dag-dag ah loo joojiyo isticmaalka iskuulada iyo dhexgalka iskuulada ay carruurta iyo macalimiinta joogaan. In la joojiyo iskuulaadka in loo isticmaalo goobo tabar ciidan iyo keydinta hubka, ama laga fuliyo howl ciidan.

- Hirgalin baahsan oo si dag-dag ah lagula socodsiinayo dhamaan ciidamada iyo horjooge yaashoodaba in ay joojiyaan weerarrada iskuulaadka, macallimiinta, iyo ardayda, iyo in loo qeexo ciddii geysata weerarro noocaas ah lagula xisaabtami doono.

- Dhiirri galin xuquuqda waxbarashada iyadoo laga fogaanayo fara galinta mowduucyada waxbarashada ee iskuullaadka iyo fasalada dhexdooda laga bixiyo waxyaabo dhiiri galinaya carruurta iney ka mid noqdaan ciidamada al-shabaab.

- In la joojiyo dhammaan takoorka ka dhanka ah gabdhaha iyo dumarka, iyo xaddidka shaqadooda, safarkooda iyo wixi lamida.

- In laga qaado tallabo ku habboon dhammaan ka tirsanayaasha al-shabaab iyo maamulayaasha xaafadda iyagoo aan loo egeynin darajadooda, kuwa geysta dambiyada xadgudubyada waaweyn ee ka dhanka ah sharciyada bini aadanimada caalamka iyo ku xadgububka xuquuqul insaanka.

## Ku meelishayadka xulufada la ah TFG

- Hirgalin qoraal cad oo amar ku bixinaysa in dhammaan horjooge yaasha ciidamada ay si dag-dag ah u joojinayaan iney askareystaan iyo isticmaalka caruurta da'dooda ka yartahay 18-jir.

- La shaqeyn UNICEF iyo hay'adaha kale ee xuquuqda caruurrta si, si dag-dag ah loo aqoonsado carruurta ka yar 18-jir looguna gudbiyo qorshaha ururrada bulshada dib u dajinta, iyo dhaqan celinta..

- In la hubiyo in la mariyaa tallaabo waafaqsan sharciga horjooge-yaasha lagu soo oogo in ay carruur askareynayaan ama u isticmaalayaan howla kale iyo iney safka hore galiyaan.

- In la qaado dhammaan tallaabooyinka hirgalinaya in laga hortago weerarrada shacabka sidoo kalana la yareeyo qatarta meelha shacabku ku badanyahay.

- In la hubiyo meelaha iskuulada ah lana magan galiyo xiliyada howlgalada ciidan iyo in la suurta galyio inay si nabad ah macallimiinta iyo ardayda ay iskuulka uga bixi karaan dhismahiisa xilliyada howlgallada ciidan taasoo qatar u keeni karta.

- In la hubiyo in la mariyaa tallaabo waafaqsan sharciga horjooge-yaasha iyo qeybaha kale, ee geysta xadgudub qatar ku ah sharciyada biniaadanimada ee caalamka.

## Ku Qeybaha Ajaanibta ee Ka Qeybta Ah Dagaalka: AMISOM iyo Urrurka Midowga Afrika, Kenya, iyo Itoobiya

- La shaqeyn UNICEF iyo hay'adaha kale ee dhowrista xuquuqda caruurrta si aad ugu wareejisaan Ururrada Bulshada iyo Dhaqan Celinta .

- In la joojiyo dhammaan weerarrada aan kala sooceynin rayidka iyo dagaalyahanada iyo wixii laga baqdin qabo iney sababi karaan dhibaato xadka ka baxsan ay dadka rayidka ah kasoo gaarto, iyo in la qaado talaaba kasta oo suurta galineysa in looga hortago waxyaabaha loo isticmaalo ku dagaal galka ineysan wax gaarsiinin shacabka iyo meelha gabbaadka ah oo ay ka mid yihiin iskuulaadka si loo yareeyo qatarta.

- Sawira qariirad tilmaameysa meelaha muhiimka ah, iskuulaadka, meelaha rayidku ku badanyahay, idinkoo ka helaya cawino xarumaha ay quseyso marka lagu daro qeybaha wax barashada, in la ogyahay iskuulaadka ku yaala meelaha howlgalka ciidan ka socdo si loo hubiyo nabadgalyadooda.

- In la sammeeyo dadaal lagu hubinayo iney si nabadgalyo ah ay ardayda iyo macalimmiinta uga bixi karaan dhismayaasha iskuulada xilliyada ay howlah ciidan socdaan kuwaasoo ay qatar uga iman karto.

- In la hubiyo eedeymaha wax ku oolka ah ee xuquuqul insaanka iyo ku xadgudubka sharciga biniaadannimada ee ay geystaan ciidamo hubaysan si dag-dag ah,oo ka dhan ah, baaris muuqata loogu qaadaa cidda ka mas'uulka ah geysashada waxyeeleynta cul-culus, iyadoo aan loogu aabbayeelin darajadooda, lana marsiiyaa sharciga. Qaas ahaan waa in baaris buuxda lagu sameeyaa

dhibaatooyinka soo gaaray iskoolaaadka ku yaala meelaha AMISOM howlgalada ciidan ka wadaan, si loo suurta galiyo laaguna qaado dambiga kuwa mas'uuliyadda dambiyada dagaalka leh.

- In la hubiyo ciidamada la dagaal galinayo in la siiyo tabar ku filan oo waafaqsan sharciga biniaadannimada caalamka, marka lagu daro dhowrista rayidka iyo goobaha rayidka u, iyo magangalyooyinka qaaska u ah carruurta in la siiyo xilliyada dagaalada hubeysan.

## Ku Dhammaan Waddamada iyo Ururrada Deeq bixiye-yaasha ku sugan Soomaaliya

- Inaad ugu baaqdaan dhammaan qeybaha ciidamada in ay joojjiyaan askareynta carruuta iyo iney u isticmaalaan carruurta ciidan ahaan Somaaliya gudaheeda, kufsi iyo guur qasab ah, iyo weerarrada loo geysto ardayda, macalimmiinya, iyo ikuulaadka.

- Waa muhiim xilligan gabagabada ah ee ka harey waqtiga kala guurka In la sammeeyo qorshe qaran oo caddeynaya horumarinta iyo hirgalinta lagu joojinayo askareynta iyo isticmaalka carruurta ka tirsan xoogaga TFG-da.

- In la siiyo TFG-da taageero kasta oo suurta gallinkarta iney awood u yeelato kala shaandheynta da'da askarta ay qoraneyso si ay uga hortagto askareynta carruurta iyo isticmaalkooda.

- In la bixiyo taageerooyinka muhiim ah oo ku habboon badbaadada carruurta iyo dib u dajintooda, dhaqan celin, iyo Qorshaha dib u Dhexgalaka Bulshada kaasoo la raacinayo tababaro xirfad leh, qorsheyaal waxbarasho, iyo daweyn cilminafsi iyo tala bixin isugu jirta in la siiyo kuwa ka badbaaday faraxumeynta iyo hujuumka loo geystay, Soomaaliya dhexdeeda iyo marka lagu daro xeryaha IDP, iyo xeryaha qaxootiga ee waddamada dariska..

- Lagu taageero TFG-da xaqiijinta in xabsiyeynta carruurta uu noqdo mid waafaqsan kan caalamka u yaalla —lana hubsado in xabsiyeynta carruurta ay noqoto mid laga maarmi waayay., in carruurta lagu xiro meel ka gooni ah dadka waaweyn, in ay

helaan sharci yaqaan, iyo iney helaan Dhaqancelin, Bulsho dhexgal, iyo in ay muhiimmadda koowaad noqoto baahida carruurta.

- In loogu baaqo TFG-da iney ogolaato adeegyada qaaska ee daryeelka carruurta ay sameyn karaan baaris ka madaxbannaan oo aysan faragalin ku laheyn dhammaan xarumaha xabsiyadeeda marka lagu daro kuwa aadka loo ilaaliyo.

- In kor loo qaado taageerada waxbarashada iyo dhaqaalaha qeybaha magangalyeynta oo la filayo inuu ka yimaado dhawaan racfaankii loo qaaday (CAP)

- In la hubiyo tababarada la siinayo ciidamada iyo qeybaha kale ee TFG-da in lagu daro mid ku habboon sharciyada caalamiga iyo bini aadanimada, marka lagu daro dhowrista rayidka iyo goobaha rayinka iyo xuuqda carruurta.

- In la kordhiyo dhaqaalaha iyo cawinada si kor loogu qaado wax- qabadka Xafiiska u Qaabilsan Howlaha Biniaadannimo ee (OHCHR) si uu ula socdo ku xadgudubyada xuquuqaha. .

- In la maal galiyo lana taageero xubinta wardoonka ee UN-ka ama qaar kale oo la mid noqon kara iney UN-ka u ururiyaan dambiyada waaweyn ee caalamiga ah ee ka dhacay Soomaaliya iyo iney la yimaadaan ka guul gaarida mas'uuliyaddeeda.

## Ku socoto Golaha Ammaanka QM iyo Golaha QM ee Xuquuqul Insaanka

- In la kordhiyo cadaadiska TFG-da sida ugu dhaqsiyaha badan iney u hirgaliso uguna dhaqanto qorshihii Qaramada Midoobay ay u qabteen waqtiga in lagu hirgaliyo joojinta askareynta iyo isticmaalka carruurta, marka lagu daro hirgalinta qorshaha kala shaandheynta ee lagu hubinayo in aysan TFG-da qoranin carruur ama xoogaga la ah xulufada maleeshiyaadkooda in ay qeyb ka noqdaan.

- Inkastoo guddiga cuna qabateynta Soomaaliya iyo Eritrea, hor istaageen cunaqabateyntii la magacaabay oo ay ka midka ahayd in xayiraad maaliyad, safar ka-joojin, shaqsiyaadka iyo ciddi kale oo masuul ka ha xadgudubyada ka dhanka ah carruurta, marka lagu daro isticmaalka iyo askareynta carruurta, dilka, miidaaminta,

hujuumida ku saleysan faraxumeynta iyo takooriska dhadigga, iyo weerarrada iskuulaadka, iyadoo la tixgalnayo go'aannadii golaha ammaanka 2002 (2011).

- Codsi warbixin joogta ah oo diiwaan galineysa weerarrada iskuullaada, ardayda iyo macalimmiinta iyo dhammaan qeybaha uu qilaafku u dhexeeyo iney sahlaan dariiq carruurta u suurta galinaya wax barashada, marka lagu daro iskuulada loo isticmaalo militariga iyadoo loo marayo baaris ay hormood ka tahay Qaramada Midoobay iyo aalad war bixin oo ku saleysan carruurta iyo ku lug- lahaashadooda dagaalka.

- In la kordhiyo Cawinada taageerada ee OHCHR si ay ula socdaan xad gudubyada xuquuqaha iyo in la magacaabo si buuxdana loo shaqaaleeyo cid qibrad u leh xuquuqda caruurta.

- La maalgaliyo lana taageero waaxda war bixinta ee Qaramada Midoobay ama la helaa aalad kale oo ku haboon—loo soo marayo UN-ka si loo ururiyo dambiyada caalamiga ah ee ka dhacay Soomaaliya iyo ku adkeynta horumarinta talaabooyinka looga hortagayo dhicitaankooda.

- Hubin in la siiyo taageero ku filan kooxda u qaabisanka UN-ka Soomaaliya iyo Eritrea warbixinnada iyo loo ogolaado iney qortaan laba dheeraada oo qibrad u leh xuquuqul insaan ka oo la shaqeeya kooxda

## Ku Kooxda u Qaabilsan Waddanka Soomaaliya Habka Baaritaanada iyo War bixinta ee hormoodka ka yihiin Qarammada Midoobay

- In la kordhiyo baaritaanada weerarada iskuulada, ardayda iyo macalimmiimnta, iyo in tallaabo laga qaado dhamaan kooxaha qilaafku u dhexeeyo ee hor istaaga dariiqa waxbarashada carruurta, marka lagu daro xarun-ciidan u isticmaalidda iskuulada, iyo dambiyo kale oo waaweyn oo loo geystay carruurta oo ay kordhyeen xadka dagaalada, sida ay codsatay Golaha Xallinta Ammaanka 1998 ee Luulyo 2011. Hubin, warbixinada lasoo ururiyo loo gudbiyo dhuumaha ku haboon, sida kooxaha golaha ammaanka ee ka shaqeeya mashruucyada horumarinta carruurta lagu askareeyay dagaalada.

- Ururin warbixin la xiriirta shaqsiyaadka iyo ciddii ku lug leh xadgudubyada carruurta ka dhanka ah taasoo noqon karta tilmaameysiga cunaqabateynta ee Golaha Amaanka Go'aamada 2002 (2011) lana siiyo war bixintan Guddiga Cunaqabateynta ee Soomaaliya iyo Eritrea.

## Ku socotot hay'adda Carruurta ee qarammada Midoobay (UNICEF) iyo Ururrada Kale ee Dhowrista carruurta u Qaabilsan Soomaaliya iyo Kenya

- In la kordhiyo baahinta dib u Dajinta, Dhaqan Celinta, iyo Mashruucyada dib u Dhexgalka Bulshada ee carruurtii ka midka noqotay ciidamada dagaalada iyo carruurta lagu qoray guurka qasabka ah, marka lagu daro mashruucyo wax barasho iyo tababaro xirfad leh, iyo daaweyn iyo in laga caawiyo cuqdadnafsiga dad dhex galka, haddii macquul aytahay la gaarsiiyo gudaha Soomaaliya iyo waddamada qaxootiga qaabilaya .

- In la qoro shaqaale qibrad u leh carruurta ka soo baxsatay a-lshabaab iyo maleeshiyaadka kale ee ku sugan Soomaaliya dhexdeeda iyo Kenya (Dadhaab iyo islii)

- In lala shaqeeyo deeq bixiyayaasha gudaha Kenya si loo horumariyo loona gaarsiiyo mashruucyada carrurta magaallooyinka ku nool ee horay uga tirsanaa kooxaha hubeysan si loogu helo deegaan nabadgelyo leh , wax barasho iyo xirfado kale.

- In lala shaqeeyo Hay'ada Qarammada Midoobay u Qaabilsan Qaxootiga (UNHCR) si loo hirgalyo talaabo lagu gaari karo horumarinta dariiq loo maro sidii xiriir loola yeelan lahaa qaas ahaan kuwa aan cid ka mas'uu ah la soconin,si looga diiwaan galiyo Hay'ada Qarammada Midoobay ee Xuquuqda Carruurta (UNHCR) si loogu helo wax barasho iyo cilminafsiga bulsho dhex galka.

## Ku socoto Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Siyaasadda Soomaaliya iyo Xafiiska QM ee Xuquuqul insanka

- In la kordhiyo tirada saraakiisha u qaabilsan Xuquuqul Insaanka baarista iyo shaacinta war bixinada wax yeeleynta xuquuqul insaanka, gudaha Soomaaliya iyo xeryaha qaxootiga ee waddamada dariska. In la hirgaliyo jago si joogto ah diirada u saareysa ku xadgudubyada xuquuqda carruurta iyo in loogu baaqo deeq bixiyeyaasha hubinta maal galin ku filan.

- In la kordhiyo la shaqeynta kooxda u xilka saran baaritaanada Soomaaliya iyo Eritrea si loo hubiyo xadgudubyada ba'an ee ka dhanka xuxuuqda carruurta in loo soo ururiyay si habeysan iyo in guddiga cunaqabataytu uu la xisaabtamo dhinacyada masuuliyaddeeda le.

- In la hirgaliyo warbixinno muuqda oo sawir ka bixinaya caddeynta dambiyada waaweyn ee jabinaya xeerka caalamiga, iyo in la qaado talaaabo looga hortagayo in ay dhacdo.

## Ku socoto Xoghayaha Guud QM Ergayga u Qaabilsan Dagaalada Hubeysan ee Carruurta

- Si joogta ah in loogu baaqo TFG-da in ay buuxiso shuruudaha ah horumarinta qorshe qaran oo lagu soo af-jarayo isticmaalka iyo askareynta carruurta ee TFG-da dhexdeeda, waana inay waqtiga xaddidan ee loo qabtay ku gaartaa talaabooyin wax ku ool ah oo la taabankaro.

- Codsi, in ay deeq bixiyayaashu la yimaadaan horumarin cad oo jawaab ka bixineysa cawinada carruurta ka soo baxsatay ciidamada ku dagaalamaya Soomaaliya.

- Waxaa loogu baaqayaa Xafiiska Golaha Ammaanka (UN) in ay kordhiyaan dhaqaale iyo macluumaad diyaar u ah kooxda Baarista UN-ka ee Soomaaliya iyo Eritrea.

## Ku socoto EU, UNHCR, iyo UNICEF-ta- Uganda

- In la hubiyo dhammaan carruurta lagu soo aqoonsada mashruuca tababarka Bihanga ee EU-da fangareyso in loo ogolaado fursad ay magangalyo Uganda uga raadsan karaan..

## Ku socoto Golaha Baarlamaanka Ameerika

- In dib loo qoro Sharciga 2008 ee Joojinta Akareyta Carruurta cawinada nabad ilaalinta ee hoostagta qeybaha ka hortagga waddamada carruurta u isticmaala askar ahaanta ee ciidanka militariga Ameerika (US).

## Ku Hey'ada QM u Qaabilsan Xuquuqda Carruurta ee UNICEF, iyo Urruro kale oo ka Shaqeeya Kenya iyo Itoobiya

- Hubin, in la helo xeellad lagu aqoonankaro carruurta ku lugta laheyd maleeshiyaadka hubeysan isla marka ay yimaadaan xeryaha qaxootiyada ee waddamada dariska. In la hubiyo carruurta horey ugu lugta laheyd ciidamada dagaalamaya in la siiyo wax barasho ku haboon iyo iyagoo lagu daro mashruucyada daryeelka carruurata dayacan iyo carruurta bulshada inteeda kale.

- In loo hirgaliyo xarummo caafimaad oo xagga maskaxda ah carruurta ku jira xeryaha qaxootiga ee u baahan cawino ka badan cilminafsiga dad dhexgalga ee carruurta badaanaa ay hesho.

- In la kordhiyo dardargalinta wax barashada iyo tababarada xirfadaha xambaarsan ee xeryaha qaxootiga dhexdooda, sidoo kale la kordhiyaa dhismaha iskuulaada iyo shaqaaleynta macalimmiita.